Mabaadi'da Barnaamijyada Xalalka Waara

Ay Dawladdu hogaamiso

Waxqabadyadu waxay ka taageeraan dawladda inay qaadato mas'uuliyadda ka saaran u fududaynta xalalka waara bulshooyinka ay barakacyadu saameeyeen, qaataan kaalin hoggaamineed oo ay isu-duwaan saktarada iyo dhammaan lakabyada heerarka dawladda iyadoo lagu saleynayo Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo qaababka kale ee dawladda ee khuseey. Waxqabadyadu waxay ka taageeraan heer qaran, federaal hoosaad iyo dawlad maamulada degmoooyinka dhinaca qorshaynta, isku duwida, gudbinta iyo kormeerka adeegyada iyo barnaamijyada

Aag ku saleysan

Waxqabadyadu waxay diirada saaraan 'bulshooyinka ay barakacyadu saameeyeen' oo ay ku jiraan barakacayaasha, qaxootiga soo noqday iyo dadka martida loo yahay ee ku sugan aag qeexan waxayna ka falceliyaan xaaladaha nololeed ee gaarka ah, halista iyo fursadaha jawiga deegaanka. Wada-hawlgalayaasha ka shaqeeya isla aagga waxay ujeeddadeedu tahay gaaritaanka saameyn isku-xiran oo weyn iyadoo loo marayo falanqeyn wadajir ah, qorsheyn iyo isuduwid iyo abuurista dariiqooyin gudbin ah

Wadajir ah oo Dhamaystiran

Waxqabadyadu uma baahna inay wax ka qabtaan dhammaan dhinacyada xalalka waara laakiin waxay gacan ka geystaan qaabka mustaqbalka fog gaara oo dhammaystiran oo ku aaddan barakaca ee ay ku hawlan yihiin ururada hawlwadeenada ee dhinacyada bani'aadamnimada, horumarka, xuquuqda aadanaha iyo kuwa nabadda / / dowlad dhisidda. Wada-hawlgalayaashu waxay ka shaqeeyaan gaaritaanka natiijooyinka wadajirka ah ee ay sida wada jirka ah u baacsanayaan dawladda iyo hay'adaha aan dawliga ahayn oo ay ku jiraan bulshada rayidka ah, bulshada ay saameyntu gaartay laftoodu, waaxda gaarka loo leeyahay, cilmi-baarista / tacliinta iyo bulshada caalamka.

Ku Saleysan Kaqaybqaadasho iyo Bulsho

Waxqabadyadu waxay awood u siinayaan 'bulshooyinka ay barakacyadu saameeyeen' oo ay ku jiraan barakacayaasha, qaxootiga soo noqday iyo jaaliyadaha martida loo yahay inay si firfircoon uga qaybqaataan howlaha xulashada, qorshaynta, hirgelinta iyo kormeerka. Waxqabadyadu waxay ka caawiyaan bulshooyiinka inay qeexaan mudnaantooda isla markaana ay fududeeyaan dib u heshiisiinta iyo wada noolaanshaha u dhexeeya bulshada xubnaheeda iyadoo loo marayo habab loo dhan yahay.

Xuquuqda- iyo Baahiyaha ku saleysan

Waxqabadyadu waxaa haga baahida, xuquuqda, danaha sharciga ah, ilaha kheyraadka iyo awoodaha bulshada ay saameeyeen barakacyada. Waxay ixtiraamayaan xuquuqda dadka barakacayaasha ah inay ku sameeyaan xulasho xog-ogaal ah oo ikhtiyaari ah xalka waara ee ay ayagu doonayaan loona fududeeyo helitaanka degdega ah ee aaminka ah ee taageero iyo macluumaad. Waxqabadyadu waxay ujeeddadeedu tahay inay dadka barakacay awood u siiyaan inay si buuxda ugu raaxaystaan dhammaan xuquuqdooda dhaqaale, sharci, dhaqan-dhaqan iyo siyaasadeed ee rayid ah iyadoo aan loo takoorin sababa la xiriira barakacooda awgood.

Xasaasi u ah Jinsiga, Da'da, Naafanimada iyo Takoorka Diidmada

Waxqabadyadu waxay ahmiyad gaar ah siiyaan tabashooyinka iyo aragtiyyada gaarka ah ee haweenka, dhalinyarada, dadka naafada ah iyo kooxaha la hayb sooco waxayna tixgelinayaan dhaq dhaqaaqyada aqoonsiga iyo farsamooyinka ka-reebitaanka ee ah caqabadaha hor taagan

helitaanka xuquuqda, adeegyada iyo fursadaha loo simanyahay.

Waara

Waxqabadyadu waxay fududeeyaan xalalka hoggaamiyo xaaladaha deegaanka maxalliga ah ee dowladda, bulshada rayidka ah, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo bulshada laftoodu hergelinayaan. Waxay xoojinayaan doorka dowladda iyadoo loo marayo dhisidda awoodda aqooneed ee sida nidaamsan u dhacda ee taageeridda geeddi-socodka hay'adaha iyo qaab-dhismeedka awooda siiya xalalka waara ee dhammaan heerarka. Waxqabadyadu waxay mudnaanta siiyaan fulinta ayadoo loo marayo wadiiqooyinka dowliga iyo bulsho ee jira ujeeddadeeduna tahay in lagu daro dadka ku barokacay halkaan halkii laga dhisi lahaa qaabab is barbar socda. Waxqabadyadu waa kuwo xasaasi u ah khilaafka waxayna gacan ka geystaan dhisidda nabadda waarta iyo horumarka iyadoo laga gudbayo 'haugeysan waxyeello'. Waxqabadyadu waxay ku saleysan yihiin qorsheynta mustaqbalka fog, jaangooyooyin wakhtiyeed oo sannado badan ah iyo miisaaniyado waxayna awood u leeyihiin inay kaga falceliyaan isbeddellada ku yimaada dhaqdhaqaaqyada iyadoo loo marayo barnaamijyo dabacsan oo la qabsi leh.

Maxay yihiin xalalka waara ee xalka u ah barakaca?

xal waara la gaaro marka Barakacayaasha aysan mar dambe helin gargaar gaar ah iyo baahiyo ilaalined oo la xiriira barokacooda oo dadka noocaas ahna ay ku raaxeysan karaan xuquuqdooda aadanaha iyadoo aan loogu kala eexanayn barakacooda awgeed. Waxaa lagu gaari karaa dib udejin waarta oo ku helaan meesha asalka ay ka soo jeedaan (noqosho khiyarai ah), isdhexgalka maxaliga ah ee meelaha ay barakacayaasha u qaxaan ama qeyb kale oo dalka ah iyadoo lagu saleynayo dookhooda

Waa maxay hab socodka xalka waara?

Helitaanka xalal waara waxay u baahan tahay yareynta baahiyaha dhow iyo kuwa fog si tartiib tartiib ah iyo u nuglaanshaha bulshada ay saameeyeen barakacyadu iyo awood u siinta dadka barakacay inay dib u dhistaan noloshooda isla markaana ay noqdaan kuwo isku tiirsan iyadoo loo marayo dib-u-dhexgal dhaqaale iyo mid bulsho oo waara oo ka dhaca goobta barokaca, meesha asalka ka soo jeedaan ama meel kale oo dalka ka mid ah. Gaaritaanka xalal waara badanaa waa geeddi-socod adag oo u baahan hoggaamin siyaasadeed iyo isku-darka dhamaan ururada ku lug leh ee xuquuqul insaanka-, bani'aadamnimada-, horumarka-, nabadda- iyo dowlad dhisidda.

Waa maxay qaab-hawleedka caalami ah, heer gobol iyo heer qaran ah ee hagaya shaqada dhinaca xalalka waara?

Heerarka caalamiga ah ee wax ka qabanaya xuquuqda iyo waajibaadka ku aadan barakacayaasha iyo bulshooyinka ay barakacyada saameeyeen guud ahaan iyo hagidda xalalka waara waxaa laga heli karaa *Mabaadi'da Hagayaasha ee Qaramada Midoobay ee Barakaca Gudaha iyo Qaab dhismeedka IASC ee Xalalka Waara. Shirka Midowga Afrika ee loogu talagalay Difaaca iyo Caawinta Barakacayaasha Qaarada Afrika* (Heshiiskii Kampala) waa qaab dhismeedkii ugu horreeyay ee sharciga ah in difaaco xuquuqda barakacayaasha. Soomaaliya way saxiixday laakiin ma ansaxinin heshiiskii Kampala. Gudaha Soomaaliya, Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2017-2019 ayaa ah dukumintiga haga farsamaynta dadaalada ka falcelinta horumarineed ee lagula tacaalayo barakaca iyo in loo helo xalal waara bulshooyinka uu saameeyey barakaca. Heer federaal hoosaadka, dhowr qaabdhismeed siyaasadeed ayaa wax ka qabta barakaca gudaha waxaana islamarkaan tiro sii kordheysa oo degmooyin ah ayaa soo saara *Qorshe hawleedyo Bulsho* oo ayagoo ay weheliyaan bulshooyinka uu saameeyey barakaca.